



Denver Public Schools

ADEEGYADA CUNTADA IYO NAFQAADA

TEL 720-423-5600

FAKAS 720-423-5629

www.dpsk12.org



WAALIDIINTA/MASUULIYIINTA: KANI WAA MACLUUMAAD MUHIIM AH FADLAN AKRI

Si aad u badiso maalgalinta dugsigaagu helo si ilmahaagu wax u barto, waxa **very** aad u muhiim ah inaad dhammaystiro Dalabka Gargaarrada Cuntada kuna soo celiso maqaayadda dugsiga ilmahaaga ama Xafiiska Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada 2320 W. 4^{aad} Avenue, Denver, CO 80223 sida ugu dhakhsaha badan.

Dugsigaagu wuxuu ka helaa maalgalintiisa in badan oo kamid ah ardayda **u qalanta gargaarrada cuntada** xiitaa haddii ayna cunin cuntada dugsiga. U qalmid oo kaliya, ayuu dugsigaagu ku helaa lacag baahiyaha waxbarasho; sidoo kale, waxa jira barnaamijyo ay dhici karto inaad ka hesho dheefo kale kuwaasi oo la socda u qalimidda cuntada bilaa lacagta ah ama qiime dhimista leh sida; **Dhaafisyada Khidmadda Buugaagta, Deeqaha Waxbarasho, khidmadaha Xarunta Madadaalada Xagaaga ee Qiime Dhimista leh, khidmadaha Ciyaaraha ee Qiime Dhimista leh. Barnaamijyadan qaab dugsiga kusalaysan ayaa loo bixiyaa; fadlan la xidhiidh dugsiga ilmahaaga wixii tafaasiil barnaamij ee dheeraad ah.**

Kadib marka dalabka cuntada laga shaqeeyo, waxaanu kuu soo diri warqad ogaysiin taasi oo caddaynaysa xaaladda ilmahaaga ee cuntada bilaa lacagta ah, qiime dhimista leh ama lacagta la iska wada bixinayo. **Fadlan hayso warqaddan** inta macluumaadka Dalabka Gargaarrada Cuntadu qarsoodiga yahay, waxa dhici karta inaad doorato inaad isticmaasho warqadda ogaysiinta si ay carruurtaadu ugu qalmaan, gargaarrada kale ee jira.

FADLAN OGOW – Ardaydu waxay ku sii nagaan xaalad la mid ah tii sannad dugsiiyeedkii hore 30 maalmood ee u horreeya hawlgalka dugsiga. Haddii dalab la dhammaystiray aan la helin oon laga shaqayn 30 maalmood gudahood wakhtiga loogu talagalay waxay noqon doonaan qaar lacagta la wada bixiyo ilaa dalabka la helo oo xaalad cusubna la go'aamiyo.

SIYAASADDA LACAG QAADISTA: Arday kasta oo kujira fasallada ECE ilaa fasalka 5^{aad} kaasi oo illaawa ama dhumiya lacagtiisa, waxa dhici karta in laga qaado \$5.55. Kahor xadkan intaan la gaadhin, ogaysiis qoran ayaa la siin doonaa ardayga si loo ogaysiiyo waalidka/masuulka. Haddii lacagaha la qaadayo la bixin waayo maalinta dugsii ee xigta, cunto beddel ah ayaa la bixin doonaa. Haddii lacagaha aan wali la bixin 2 maalmood gudahood, cuwaaf nafaqo leh ayaa la bixin doonaa halkii cuntada. Xaaladaha oo dhan waa, **KHASAB** in la bixiyo lacagta. **Fadlan xasuusnaw inaad ka masuul tahay dhammaan lacagaha la qaado qadada ilaa dalabkaaga cuntada la dhammaystiro laqaqana shaqeeyo xafiiskayaga dhexe.**

Ma jiraan **LACAGO** la qaadayo oo la oggol yahay ardayda fasallada 6 iyo ka sarreeya. Fadlan ugu diri lacag carruurtaada maqaayadda maalinta koowaad ee dugsiga ama sii qaddin maadaama aananu doonayn inaanu aragno ilmahaaga oo gaajoonaya. Hoos ka fiiri qiimayaasha.

Ardayda iyo ama waalidiinta/masuuliyiinta waxa lagu boorinayaa inay sii qaddimaan lacagta cuntada ay ku gadanayaan. Dhigashada lacag kasta waxa dhici karta in lagu shubo xisaabta gaarka ah ee ardayga, ee mid ahaan maqaayadda dugsiga ama onlayn myschoolbucks.com, iyadoo la dhimaysa fursadda lacagtooda qadada lagu illaawi lahaa, dhumintaha lahaa, ama xadi lahaa. In kastoo ardaydu ay wali haystaan ikhtiyaarka inay safka ku bixiyaan, qaddinku wuxuu kordhiyaa xawaaraha iibka, isagoo u oggolaanaya safafku inay dhakhso u socdaan oo fursadna u siinaya inay helaan wakhti ku filan oo ay cunteeyaan. Ardayda oo dhan waxay leeyihiin xisaabo gaar ah marka laga tago xaaladda bixinta lacagta. (bilaa lacag, qiime dhimis, ama wada bixin).

ILME GAAJAYSAN WAX MA BARAN KARO

Haddii aad doorato INAANAD dhammaytirin Dalab Gargaarrada Cuntada ama aanad u qalmin cuntada bilaa lacagta ah ama qiime dhimista lagu sameeyey, qiimayaasha sannad dugsiiyeedka 2016–2017 waa sida soo socda.

Qiimayaasha Quraacda

Dugsiga Hoose lacag lama qaado kaqaybqaadashada dugsiyada
Dugsiga Dhexe lacag lama qaado kaqaybqaadashada dugsiyada
Dugsiga Sare Lacag lama qaado kaqaybqaadashada dugsiyada

Qiimayaasha

Dugsiga Hoose
Dugsiga Dhexe
Dugsiga Sare

Qadada Fasallada

ECE – 5 \$1.85
6 – 8 \$2.10
9 - 12 \$2.60

Qadooyinka qiimaha la dhimay waa .40¢ fasallada oo dhan

Mahadsanid,

Theresa Hafner, Agaasimaha Fulinta, Maamulka Shirkada